


<p>Tucson Unified School District</p>  <p>XEERKA UJEEDDADA</p>	<p>CINWAANKA XEERKA Ka-qayb gaadashada Ardayga</p>
	<p>Koodhka: JE- R</p>
	<p>WAAXDA HOGGAANKA: Hoggaamminta Waxbarsho</p>

Maamulka, macallimiinta, karraaniyada ka qayb-qaatashada iyo shaqaalaha kale ee dugsiga ayaa ula shaqeeya si fiican waalidka iyo/ama mas'uulada sidii ay u sugi lahaayeen dhammaan ardaydu si joogto ah inay uga qayb-qaataan (waxbarashada). Ka qayb-gaadashada joogtada ah ee waxqabayada fasalku waxay kobciyaan fikrada kala-soorka afkaaraha, xirfadaha wada xiriirka, iyo masuuliyadda, oo dhammaan xirfadaha aasaasiga u ah shaqooyinka mustaqbalka. Ka qayb-qaadashada dugsi ee habbooni waa qayb waliba ka tirsan disibiliinka qofka oo aan annagu isku daynno inaan ku beeranno ardayda-yada sidii awood ugu heli lahaayeen inay noqdaan xubnno mas'uul ah oo ka tirsan beesha.

Qeexitaanno

- **Ka qayb-qaadashada (Attendance):** Arday kasta u joogitaankiis waxbarashada jadwalka ku jirta.
- **Maqnanshaha Aadka u Badan:** 10% ama wax ka badan ee looga baahan yahay maalmaha ka qayb-qaadashada (180 maalmood).
- **Daahitaan:** Iyada oon la joogin qolka faslaka wakhtiga gambaleelku (jalasku) garaacmo.
- **Diiwaan-galitaanka Maalmaha ka Qayb-Qaadashada:** Diwaan kasta oo qoran ama hab-elktiroonik ah oo gacanta loogu hayo ujeeddada ah sidii loo diiwaan galin lahaa ka qayb-qaadashada, maqnaanshaha, daahitaanka, ama horey uga baxa (waxbarshada) ee ardayga.
- **Waxbaritaanka Jadwalka ku Jirta:** Xiisad kasta oo ardayga ugu jirta jadwalka in u waxbarto ama jawiga loogu talagalay inay wax ku bartaan.
- **Baashaalnimo (Goo-goosad):** Maqnaansho aan la fasaxin oo ah ilmaha u dhexeeya da'da lix ilaa lix iyo toban ugu yaraan xiisad fasal ee maalinta ee dugsiga khasabka ah.
- **Baashaalnimada Ilmaha:** Ilmaha u dhexeeya lix jir ilaa lix iyo toban jir ee aan ka qayb-qaadaneyn dugsi shacab ama mid gaar loo leeyahay saacadaha wakhtiyada dugsiga lagu guda jiro, haddii raalli laga yahay mooyee.
- **Dabci Baashaal:** Waa ilmaha baashaalka dugsiga ka noqoda ugu yaraan shan maalmood gudaheeda hal sano dugsiyeed.
- **Maqnanshaha Raallida laga Yahay:** Maqnaanshaha waalidyadu/ mas'uulyadu ay diiwan galiyeen/ oggolaadeen wakhti xaddidan oo sabab leh.
- **Maqnaanshaha Raallida aan Laga Ahayn:** Maqnaanshaha aan waalidiintu/ mas'uuliyiintu ayna fasaxin ayaa loo qaadan inay atahaygu baashaalnimo iyo raalli-la'aan.

Ogeysiinta Ojeeddada iyo Wada Xiriirka

Degmada Wadajirka Dugsi ee Taksan ayaa ku camal-fali xeeladaha soo socda sidii wax ku ool leh loo fulin lahaa ujeeddada ka qayb-qaadashada.

- Kordhinta u baraarug-sannanta ujeeddada dhexdooda shaqaalaha iyada oo:
 - Lagu daro nuqul ah ujeeddada buugga-gacanta macallimiinta.
 - Habab dheerad oo ah ogeysiiska ayaa dhici karta inay ku daraan guddiyada dugsi.
- Kordhinta u baraarug-sannanta ujeeddada dhexdooda ardayda iyada oo:
 - Lagu daro soo koobitaan buugga-gacanta Xuquuqaha iyo Waajibaadyada ardayda.
 - Habab dheerad oo ah ogeysiiska ayaa dhici karta inay ku daraan guddiyada dugsi.
- Kordhinta u baraarug-sannanta ujeeddada dhexdooda waalidka iyada oo:
 - Kaga hadalka ujeeddada (soo dhaweynta) Albbaabada u Furan yihiin.
 - Habab dheerad oo ah ogeysiiska ayaa dhici karta inay ku daraan guddiyada dugsi.

Goorta ka Maqanaasho Dugsi Jirto

Waalidiinta/Mas'uuliyiinta

- Waalidiinta/Mas'uuliyiinta ayaa laga sugayaa inay soo wacaan, waraaq soo diraan am email u soo diraan dugsi maalintaa ama ka hor maalinta (maha) maqnaanshaha.
- Markay tahay dugsi sare, hadday adkaato in la soo ogeysiyo dugsi ka hor maqnaanshaha, **dugsi waa in u helaa (ogeysiinta) gudaheeda 48 saacadood** kadib marka ardaygu u ku soo noqdo dugsi; haddii kale, waxa loo qaadan inay raalli-la'aan tahay.
- Sharciga Dhowladda ayaa fareysa in dugsi diiwan galiyo sababaha ku lug dhammaan maqnaanshaha ardayda, haddaba dhamman fariimuhu waa inay wataan magaca waalidka, magaca ardayga, taariikhda, wakhtiga, iyo sababta maqnaanshaha.
- Dhammaan maqnaanshaha aan la fasaxin ee ay xaqiijiyeen waalidiinta/mas'uuliyiinta ayaa noqon raalli-la'aan.

Dugsi Hoose iyo Dugsi dhexe

- Marka u arday ka maqan yahay fasal iyo/ama maalin (u maqan yahay) ogeysiin la'aan ama fasax la'aan (dugsi ayna ogeysiin waalid/mas'uul gudaheeda laba saacadood ka danbow bilowga xiisadda ugu horeysa ee ardaygu maqanyahay) dugsi ayaa si suurto-gal ah iskugu taxalujin sidii ugu dhakhsaha badan teleefan ugu diri ama ugu ogeysiin waalidiinta/mas'uuliyiinta.
- Haddii maqnaanshuhu u saameeyo horumarka meel gaarka waxbarasho ee ardayga, waalidka/ardayga/
Macallinku(miintu) waa inay shiraan sidii ay ugu hadli lahaayeen waxyaabaha la gudboon.

Diiwaan Galinta ka Qayb-Qaadashada

- Macalliminta waxa looga baahan yahay inay u fiirsadaan si rasmi ah diwaanka ka qayb-qaadashada ee dhammaan ardayda fasalada loogu talagalay iyo waxqabyada dugsiga ee lagu talagalay.
- Maqnaansho, daahitaan, ama horey uga bax dugsi kasta waa in la ogaadaa.
- Ardayda maqan waxa loo war-galin xafiiska dugsiga.
- Shaqaalaha xafiiska dugsiga ayaa mas'uul ka ah inay xaqiijiyaan oo ay u diiwaan galiyaan sababta maqnaanshaha.

- Heerka sare (darajada fasal 6-12) ka qayb-qaadashada ayaa loo fiirsan xiisad kasta, oo lagu ururin meel-dhexaad ah dugsi kasta. Macallimiinta ayaa ka mas'uul ah inay isku eegaan maqnaanshaha fasalada iyo liiska maqnaansha maalinta.

- Heerka hoose (fasalada darajada Pre-K -5) ka qayb-qaadashada ayaa loo fiirsan mar ah bilowga maalin kasta iyo hal jeer oo galabtii ah. Macallinka, ama waayeelka hor-joogaha mas'uulka aha ayaa, ogaan ilmo kasta halka u ku sugan yahay maalinta oo idil.

Maqnaanshaha

- Dugsiga hoose (grades K - 5). Maqnaanshaha waxa lagu qeexaa ka qayb-qaadasho-la'aanta qol(l)ka-fasal ee loogu talagalay wax ka badan maalin dugsiyeed nuskeed .
- Dugsiga Dhexe iyo Dugsiga Sare (grades 6 -12). Maqnaanshaha waxa lagu qeexaa ka qayb-qaadasho-la'aanta qol(l)ka-fasal ee xiisadda loogu talagalay.
- Ardayda looma qaadanayo inay maqan yihiin marka ay fasaxa ka haystaan saraakiisha dugsiga inay aadaan meel kale oo aan ahayn faslkooda caadiga jadwalka ugu jira. (Tusaale ahaan, haddii shaqaale dugsi u ay ka filayaan arday inay ka xaadiraan meel kale goorta caadiga jadwalka ugu jirta ee wakhtiga fasalka ee ay ka midka yihiin waxqabyada ah kulanka, shirarka lala qaadanayo shaqaalaha dugsi, imtixaanka, caafimaad baritaan, casharada muusiq, ama dibad-baxa waxbarsho.) Waa mas'uuliyadda ardayga iyo/ama xubinta shaqaale ee loo gartay inay u bixiyaan macallinka dukumeenti qoran inay ka qayb-galaan kulannadan ka hor inta aan laga sii deyn fasalka.
- Maqnaanshaha ku yimid ardayga oo laga hagaajiyay ka -baajin dugsiga-dhexdiisa ayaa lagu tirinayn ka maqnaansho fasal, waxa loo calaamaydayn AA (Dugsi-dhexdiis).. Maqnaanshaha ku yimid ardayga oo loo diyaariyay ka-baajin dugsiga-ka-bax ah ayaa lagu tirin ka maqnaansho fasal oo loo calaamaydayn (AS).
- Ardayda maqnaan doonta 60 maalmood ama wax ka badan awgeed sababo jirka ah ama maskaxda ah ayaa laga saari hooygood dugsi oo lagu qori "Direct Link I " amase "Direct Link II" (sida rasmiga ah loo yaqaan Guri-jogga/Waxbar-Tele ama "Homebound/Teleteaching") oo waxbarasho la siiyo oo ka qayb-qaadashada la qaado.
- Ardayda leh 3 ama wax ka badan oo maqnaansho aan raalli laga ahayn ayaa loo war-galin Fulinta Xeerka Baashaalimada TUSD.
- Ardayda leh 10 maqnaansho isku daba-xiga oo aan raalli laga ahayn ayaa laga ridi dugsiga, ka dib kaliya marka waalidiinta/mas'uuliyiinta lala xiriiro, qorshe ka hor-tag

la abuur, Ka-hor-tagga Dhicitaanka iyo Fulinta Xeerka Baashaalimada loo waco, oo wax natiijo ah la gaari waayo. Diwaanka ayaa tilmaaami dhammaan la xiriiriyada iyo taageerda la bixiyey.

Ka-soo-Kabashada Shaqada

- Macallimiintu waa inay siiyaan shaqo ka soo kabasho ah dhammaan ardayda maqan (kuwa raallida laga yahay iyo kuwaa aan laga ahynba) cashar kasta.
- Ardaydu waxay lahaan wakhti si caqli-gal ah (1kiiba 1 maalin oo maqnaansho, 1 maalin ka soo kabashada, iwm.) inay soo celiyaan shaqadooda. Macallimiintu waxay laga yaabe ku kici karaan inay ka dhaafaan arrinta iyaga oo sal uga dhigaya xaalado gaar ah.
- Nidaam u gudbin isku-dubbaridan oo dugsiyeed oo ah ka soo kabashada ardayda ayaa dhic karta inay soo saaraan guddiga dugsi.

Maqnanshaha Raallida laga Yahay

- Maqnaanshoka ku timid xanuun, fasax, geeri ku timid qoyska, xusidda diinta, shil dhacay, ama kuwa kale oo xaalado an caadi ahayn oo qofka u gaar ah ayaa laga yaaba in raalli laga noqodo, haddii farriin laga helo waalidiinta/mas'uuliyiinta iyaga oo sheegaya maalinta, wakhtiga iyo sababta maqnaanshaha.

Maqnanshaha aan Raallida Laga Ahayn

- Maqnanshaha aan raallida laga ahayn ayaa saamayn ku lahaan karta natiijooyinka buundo, qiimaynta, ka qayb-galaka waxqabyada ka baxsan casharada iyo gubitaanka/qalin-jabinta.
- Ilaa inta lagu ogaanayo inay tahay si ka duwan iyada oo waalidku/mas'uulku u taleefan u soo waco dugsi iyo cudur-daar raalli ka noqosho qoran waalidku/mas'uulku laga helo mooyee, maqnaansho kasta waxa loo qaadanayaa mid aan raalli laga ahayn.
- Dugsiga hoose (fasallada K-5). Iyada oo la raacayo sharciga gobolka, haddii u arday ku jira kindergarten-ka ama fasallada kowaad ilaa ka siddeedaad u ka maqnaado dugsi iyada oon raalli laga ahayn ama ogeysiis la'aan dugsi (dugsiga meyna ogeysiin waalidku/mas'uulku) , laba saacadood gudaheed xiisadda ugu horeysa ee ardaygu u maqan yahay, ayaa saamayn isku day cudur-daar sabab caqli-gal ah inay si dhakhso leh taleefan la waco oo la ogeysiyo waalidiinta/mas'uuliyiinta ka maqnaanshaha ardayga dugsi.
- Dugsiga sare (6-12). Haddii u arday dugsi ka tago markay tahay maalintii oo uuna soo marin xafiiska ka qab-qaadashada ama xafiiska dhakhtar kalkaaliye inta uuna ka tagin dugsi, oo aan maqnaanshaha la fasaxin -tusaale, socdaal waxbarasho, – maqnaanshahan waxa u noqon doonaa mid raalli aan laga ahayn.

Ka qayb-qaadashada ugu Yaraan Looga Baahan yahay Ardayda Fasallada K- 8^{aad}

Ardayda waxa laga filaya inay joogaan fasalka 100% oo ah wakhtiga, laakiin xaaladaha aha cudurka, geerida ka dhaca qoyska, iwm., ayaa had iyo jeer u saamixin inay tani dhaco. Xaaladahan oo kale, shaqo waxbarasho u-dirka iyo shaqooyinka fasalka waa in lagaga soo kabtaa wakhti caqli-gal ah gudaheed. Dhammaan la xiriiriyada waalid/mas'uul iyo soodhex-galka wax-ka qabasho waa la diiwaan galinayaa.

Ogeysiinta Isku-xig-xigta

- Waalidiinta/mas'uuliyiinta ayaa lala xiriiri marka maqnaanshuhu ka hor yimaadaan horumarka loo maro sidii loo gaari lahaa ka-filitaanka (waxbarasho).
- Calaamadda ugu horeysa (ee lagu arko) arday in u yahay dib-u-dhac, laga yaabe dhowr maqnaansho awgeed , ayaa loo dajin qorshe wax-ka- qabasho iyada oo lala kaashanayo waalidiinta/mas'uuliyiinta.
- Haddii maqnaanshaha aan raalli laga ahayn, oo waalidiinta/mas'uuliyiinta lala xiriiray, oo qorshe wax-ka-qabad loo dajiyay, oo markaa wax natiijo ayna dhicin, maamulaha dugsi ayaa war-galin Ka hor-tagga Saaqidnimada (Dropout Prevention). Badbaadada/baashaalinimada/sharci fulinta deegaanka ayaa markaa lala xiriiri markay tahay maqnaanshaha an raallida laga ahayn ee 3^{aad}.
- Dhammaan wada xiriiryada waaliyada ee ku saabsan maqnaanshaha ay tahay inay ku jirto kelmadaha soo socota:
- Markay tahay inay noqoto in ardayga lagu reebo dugsi waxa ka dambeeya saacadaha caadiga ah waa mas'uuliyadda dugsi inay war-galiyaan waalidka ka hor intaan lagu reebin ilmaha dugsi.
- Waalidiinta/mas'uuliyiinta ardayda dugsi dhexe ayaa la siin ogeysiin qoran ka dib maqnaanshaha 3^{aad}, 6^{aad} iyo 10^{aad} (raalli laga yahay ama aan laga ahayn). Waraaqo loo diri maayo waalidiinta/mas'uuliyiinta carruurtooda u maqan meherad shaqo, ka joojin dugsi, iyo xanuun joogto ah.

Cawaaqiibta (ku dambeynta) Maqnaanshaha Aadka u Badan Ardayda Darajada Fasallada K – 8^{aad}

- Shaqo ka soo kabasho ah oo u-qalanta ayaa loo diri.
- Wakhti dheeraad ah ayaa laga yaabaa in loo baahdo (tusaale, ka hor ama waxa ka dambeeya dugsi).
- Maqnaanshaha aadka u badan ayaa laga yaabaa inay saameeyaan buundooyinka darajo.
- Maqnaanshaha aan raallida laga ahayn ayaa laga yaabaa inay ku jirto u gudbinta sarkaal u-qaabilsan baashaalinimada iyo ku qaaditaan dambi.

Ka qayb-qaadashada ugu Yaraan Loo Baahan yahay Ardayda Fasallada 9^{aad} – 12^{aad}

Waxyaabaha looga baahan yahay ka qayb-qaadashada dugsi sare ayaa dhahaya, qayb ahaan, in haddii laguugu xisaabiyo dhibco waxbasha koorso kasta ha ahaate, ardaygu waa

in loo helaa buundo ka gudbitaan ah koorsadaas. Ka qayb-qaadashada fasalka, waxqabyada kooxeed, ka qayb-galka wada hadalka, laabratariyada, iwm. ayaa horumarisa kartida ardayga in u helo buundada isagu/iyadu helo/sho.

U-Adeegsi

- Ujeeddadan ayaa loo adeegsan karaa ardayda ku jirta darajada fasal ee 9^{aad} -12^{aad}.
- Ujeeddadan ayaa loo adeegsan karaa koorso kasta goonideeda.
- Ardayda ka soo beddelata fasal oo ku soo beddelata fasal kale muddada sannad dugsiyeedka ayaa ka qayb-qaadashadooda fasal loo beddeli doonaa fasalka cusub.

Ogeysiinta Isku-xig-xigta

- Hab socodka ogeysiinta ayaa khuseysa tirada ka-maqnaansho ee ee koorso kaliya. Arday ayaa dhici karta in la ogeysiyo dhow jeer oo kala duwan haddii maqnaansho aad u badani jirto wax ka badan hal fasal.
- Dugsigu waa in u war-galiyaa kuwa Ku-Takhasusay Ka-hortagga Saaqidnimada waxa ka dambeeya maqnaanshaha 3^{aad} sidii loo bilaabi lahaa hab-socodka wax-ka-qabashada.
- Waxa ka dambeeya maqnaanshaha 3^{aad}, 6^{aad}, iyo 10^{aad} (raalli laga yahay ama aan laga ahayn), maamulka dugsiya ayaa u diri ogeysiis waalidiinta/mas'uuliyiinta ardayga, kuwa Ku-Takhasusay Ka-hortagga Saaqidnimada, La-taliyaha Hagitaanka.
- Waraaqaha la diro ayaa u wargalin waalidiinta/masu'uuliyiinta sida soo socota:

Waxa ka dambeeya maqnaanshaha 3^{aad}: Ardaygu waa in u ogsoonaadaa in ka-qaadashada laga yaabe ay saamayn ku yeelato buundada (natiijo waxbarasho). Fulinta Baashaalinimada TUSD ayaa la war-galin haddii maqnaanshuhu yahay mid aan raalli laga ahayn.

Waxa ka dambeeya maqnaanshaha 6^{aad}: Marka ardayga u maqan yahay ku dhawaad tirada ugu badan ee maqnaanshoo nus ahaanteed, laga yaabee in u waayo ugu xisaabinta haddii u maqnaanshaha u sii wado Waalidiinta/Mas'uuliyiinta iyo Macallimiinta/La-taliye-yaasha/Maamulaha ayaa laga yaabee in loo qabto shir lagaga hadlo sidii loo dajin lahaa qorshe ka hor-tag.

Waxa ka dambeeya maqnaanshaha 10^{aad}: Ardaygu waxa laga yaabaa in uuna helin ugu xisaabin awgeed maqnaansho aad u sii badan, marka rafcaan la sugayo. Maaamulaha/Macallinka/La-taliyaha/Takhasusaha Ka-hortagga Saaqidnimada ayaa abaabuli shir.

Fadlan ogsoonow: Iyada loo hoggaansamayo A.R.S. §15-802(E), waalidka aan ku hubin ilamaha/carruurtooda u dhexaysa 6 – 16 inay uga qayb-qaataan dugsi si joogto ah, ayaa laga yaabaa in loo qabsado dambi ay mas'uul ka yihiin.

Waraaqo loo diri maayo waalidiinta/mas'uuliyiinta carruurtooda u maqan meherad shaqo, ka joojin dugsi, iyo xanuun joogto ah.

Waraaq kasta oo loo diro waalid(iinta), codsi ayaa lagu samayn in waalidiintu/mas'uuliyiintu la kulmaan macallinka(miinta), La taliyaha, iyo/ama Takhasusaha Ka-hortagga Saaqidnimada ilmahooda. Saamaynta ay ku yeelan karto maqnaansho aad u badani

waxbarashada ardayga, xeeladaha ka hor-tag ee suurto-gal ah ee lagu baab'in karo dhibaataada, iyo caqabooyinka la xiriira maqnaanshaha ardayga ayaa laga wada hadli. Waalidiinta/mas'uuliyiinta ayaa fursad u lahaan inay la shiraan shaqaalaha dugsi, hase yeeshee, shir lala qaato waalidiinta/mas'uuliyiinta ayaan ahayn mid horey looga baahan yahay u diiditaanka u xisaabinta waxbarasho ee ardayga hoos uga dhacay in u la kulmo'waxyaabaha looga baahan yahay ka-qayb-qaadashada.

Cawaaqiibta ku dambeynta Maqnaanshaha Aadka u Badan Ardayda ee Darajada Fasallada 9^{aad} – 12^{aad}

- Shaqo ka-soo-kabasho ah oo u-qalanta ayaa loo diri.
- Wakhti dheeraad ah ayaa laga yaabaa in loo baahdo (tusaale, ka hor ama waxa ka dambeeya dugsi).
- Maqnaanshaha aadka u badan ayaa laga yaabaa inay saameeyaan buundooyinka darajo ee arday.
- Maqnaanshaha aan raallida laga ahayn ayaa laga yaabaa inay ku jirto u gudbin sarkaal u qaabilsan baashaalinimada iyo ku qaad dambi.

Dhammaan la xiriiriyada waalid/mas'uulada iyo soo dhex galka wax-ka qabasho waa la diiwaan galinayaa.

Hab-socodka Rafcaanka ee arrimaha ka Qayb-qaadashada Heerka Dugsiga Sare

Waalidiinta/Mas'uuliyiinta ama ardayda ayaa xaq u leh inaan codsadaan rafcaan dib ay u eegaan Guddiga Rafcaanka ee dugsi. Guddiga Rafcaanka ayaa iskugu jiri doon hal maamule, hal la talieye hagitaan, iyo hal macallin. Rafcaanka qoran, ee ay la socdaan waxyaabaha diiwan gashan ee taageeraya arrinta, waa in u helaa maamulaha dhismahu toban maalmood gudaheeda marka ay dhammaato muddada ugu xisaabinta. Go'aanka ugu dambeeya waxa iska leh guddiga. Maqnaasho intaa dheer ee marka lagu guda jiro hab-socodka rafcaanka ayaa ku dambayn joojinta rafcaanka iyo waayitaanka u xisaabinta.

Guddi rafcaan ayaa tix galin bixinta u xisaabinta marka:

- Maqnaanshayaasha ayaa la naaqusi oo ardayga ayaa fasalka ku sii jiri.
- Shaqada waxbarasho ee guri oo hab wakhtiga ku habboon loo dhammeeyo.
- Buundada (natiijooyinka) ayaa muujin ardaygu in u la kulmay wixii laga raby ee koorsada.
- Waxyaabo kale ayaa laga yaabe loo baahan yahay in la tix-galiyo.

Haddii natiijada fasalku ku dambeyso darajo buundada ugu dambeysa dhacitaan noqoto, ardayga ayaa rafcaan u qaadan kara buundada darajada dhacitaanka Guddiga Xukunka. (Gudbitaanka, Di-u-reebka, Dedejinta IKE – R Hab-Socodka Rafcaanka).

Waaxda Waxbarashada U-Sidashada (Exceptional) ah iyo 504

Dhammaan ardayda leh arrimo ku lug leh ka qayb-qaadashada la arki karo ayaa lagu maarayn hab la mid ah dhammaan ardayda kale, haddii Qorshaha Waxbarashada Shaqiga u muujinayo xaalado gaar ah.

Dib loogu fiirsadey: Mey 25, 2007 (Warbixin Jimce)

Dib looga shaqeeyey:

Dib loogu fiirsadey:

Tix-raac Sharci A.R.S 15-346 ujeeddooyinka iyo qaab-socodka ku saabsan ardayga leh dhibaatooyin caafimaad oo joogta ah; qeexitaan.

15-802 wax-dhigtaanka dugsi, ka-duwanaanshaha; jebinta xeer, kala marka; qeexitaan.

15-804 Sarkaalka ka qayb-qaadashada; ballanta, mushaharka

15-805 Sarkaalka ka qayb-qaadashada; awoodaha iyo waajibaadyada

15-807 ka Maqnaanshaha dugsi; u wargalinta waalidka ama qofka ardayga haya; talaalka

15-873 Ka Reebbanaanta, ka qayb-qaadasho l'aanta dillaaca (cudurka)

Tix-raac Isga-gudub Ujeeddada iyo xeerka # IKE – Gudbinta, Dib-u-reebka iyo Horey-ugu-dadajinta Ardeyda

Ujeeddada # IKE – Nidaamka Buundo/Qiimayn bixinta

Ujeeddada # JHCB – wakhtiga lo Siidaayay U dhigitaanka Diinta

Waxay beddeleysaa Xeerka TUSD # 5000 ee Maamulka Xeerka Ka-qayb-Qaadashada – Dugsiga Sare; Xeer # 5050 maqnaashaha Ardayda; Sii deynta Ardayda maalinta dugsiga, Ujeeddada # 5320 – Ku Haynta Ardayga ka dib Saacadaha Caadiga ah ee Dugsi.